**Ogaysiiska Lasoo jeediyay ee loogu talo galay Guri dejinta Lagu heshiiyay iyo Dhegaysiga maxkamada Caddaalada ah ee *T.R. v. Quigley*, Lambarka. C09-1677 – TSZ, Xaalad kusaabsan Xoog saarida Guriga iyo Jaaliyada Kusalaysan Adeegaha Caafimaadka Maskaxda loogu talo galay Caruurta iyo Dhallinyarada**

*T.R. et al. v. Kevin Quigley iyo Dorothy Teeter*, Lambarka. C09-1677 – TSZ (*"T.R."*), kulug leh gelida xoog saarida guriga iyo jaaliyada kusalaysan adeegaha caafimaadka maskaxda loogu talo galay dhallinyarada qabta ceymis tooska Gargaarka caafimaadka. Qaybuhu waxay gaareen heshiis kusaabsan xaalada si loo siyaadiyo helida isku duwista daryeel khaas ah, guriga iyo jaaliyada-kusalaysan adeegaha caafimaadka maskaxda, loona wareejiyo dhibaatooyinka iyo xasiloonida,Daryeel caafimaad oo loogu talo galay guud ahaan gobolka-dhallinyarada u qalanta kuwaas oo u baahan adeegahaan caafimaadka. Adeegaha waxaa loo qaybin doonaa marxalado shan sanno kabadan. Qaybaha waxay heshiiskaan ka bandhigeen Maxkamada taas oo biloow ahaan u ogolaatay heshiiska. Hadda adiga waxaad haysataa fursad aad ugu muraajacayn karto heshiiska adiga naftaada kadibna ugu ogolaatid maxkamada in ay ogaato waxa ay kula tahay heshiiska ra'iyigaada.

Maxkamadu waxay qaban doontaa dhegaysi cadaalad ah. Dhegaysigaan, Maxkamadu waxay tixgelin doontaa aragtida kasoo gaarta dadka kuwaas oo danaynaya heshiiska. Kadib maxkamadu waxay qaadan doontaa go'aanka ugu danbeeya ee kusaabsan haddii uu heshiisku yahay mid cadaalad ah, macquul ah, iyo mid kufilan ama haddii uusan ahayn intaan oo dhan.

Dacwada *T.R.* waa dhacdo dabakho. Dhacdada dabakhyadu, dad aad u yar ayaa waxay matalayaan dad aad u baddan (loogu yeero sida "dabakho") waxayna yihiin isla mowduucyada sharciga ah. Dacwada waxaa laga buuxiyay tobban qof oo yar-yar 2009 (kuwaas oo loogu yeero sida "dadka matalaya dabakhyada"). Dhammaana waxay ahaayeen kuwo u qalma daryeel Caafimaad iyo jirooyin maskax oo xanuun leh. Bishii Luulyo ee sannadkii 2010, Maxkamadu waxay xukuntay in natiijada dacwadu lagu dabakhi doono qofkasta oo dabakhyada katirsan. Markii ay maxkamadu samaysay xukumadaan, waxaa loo qeexay xubnaha dabakhyadu in yihiin dhammaan dadka da'adoodu kahoosayso 21 sanno kuwaas oo hadda ama mustaqbalka (1) la kulmaya ama la kulmi doono aasaaska u qalmida maaliyada daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington; (2) qabba jiro maskaxda ah ama xaalad laga soo xadiday qof xirfadleh oo shahaado u haysta habka daaweynta, ama baaritaan lagu sameeyay ama qiimayn uu sameeyay qof xirfadlahaas oo kale ah, taas oo xadideysa in uu maskaxda kajiranyahay ama qabbo xaalad jiro ah; (3) qabba daciifnimo shaqada ah, taas oo in baddan dhex gasha lajirida ama in baddan xadidaysa awooda shaqada qoyska, dugsiga ama xaalada jaaliyada; iyo (4) kuwa daboolida xoog saarida adeegaha kusalaysan guriga ama jaaliyada ee hoos yimaada daryeelka Caafimaadka uu kula soo taliyay qof xirfadleh oo shahaado sita. Sidaas daraadeed, dadka kudacwoonaya qadiyadaan dhammaan waxay yihiin dad la kulmay qeexitaanka dabakhyada, ay kujiraan dadka matalaya dabakhyada.

Xubnaha dabakhyada dacwoonaysa waxaa matalaya shan shirkad garyaqaano. Shirkadahaan waxay yihiin Xuquuqaha Curyaanimada Washington, Xarunta Caalamiga ee loogu talo galay Sharciga Dhallinyarada, Barnaamijka Qaanuunka Caafimaadka Caalamiga ah, Mashruuca Difaaca Maskaxda Dadka yar-yar, iyo Perkins Coie, LLP. Maxkamadu waxay muraajaco kusamaysay shirkadahaan' khibradaha iyo aqoonta u qalmida. Kadibna Maxkamadu waxay u cayintay ayagu in ay qareeno kayihiin dacwada. Eedaysanayaashu waxay yihiin Qaybta Washington ee Bulshada iyo Adeegaha Caafimaadka iyo Awooda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington.

Ujeeddada Heshiiska Guri dejinta waa si loo kordhiyo gelida xubnaha dabakhyada ay ku galaan xoog saarida guriga iyo jaaliyada-caafimaadka maskaxda kusalaysan adeegaha looga maalgeliyay daryeelka Caafimaadka. Adeegahaan waxaa lagu magacaabi doonaa Isku duubka ay lajirto Adeegaha Xoog saarida ("WISe"). Si kastaba adeegahaan ma ahaan doonaan kuwo si dhakhso ah ay u heli doonaan dhammaan xubnaha dabakhyada, Ayada oo lahoos imaanayo Heshiiska Guri dejinta, waxaa laga yaabaa in ay qaadato muddo dheer oo gaaraysa illaa iyo shan sanno si loo

kordhiyo muga adeega kadibna loo siiyo adeegaha dhammaantooda qofkasta kaas oo u qalma guud ahaan gobolka. Marka shuruudaheeda labuuxiyo, Heshiiska Guri dejinta waxay bixisaa in dhammaan xubnaha dabakhyada u qalma ay u helaan adeego wakhtiyaysan oo ah Isku duubka Adeegaha Xoog saarida kuwaas oo caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah.

Heshiiska Guri dejintu wuxuu leeyahay seddex qeybo oo aasaasi ah.

(1) Ujeeddooyinka

Ujeeddooyinku waxay bixiyaan qaabka iyo hoggaanka qorshaha guri dejintu.Waxay dadka kucaawiyaan sidii loo sharxi lahaa dhammaan qaybaha Heshiiska Guri dejinta, ay kujirto balanqaadyada iyo aasaaska kabixida. Waxay nagu hagayaan horumarka mustaqbalka ee nidaamka keenida adeega.

(2) Balanqaadyada

Balanqaadyadu waa waxyaabaha ama ficilada kuwaas oo dadka eedaysani ay samayn doonaan si ay u hormariyaan una bixiyaan Isku duubka Adeegaha Xoog saarida. Balanqaadyadu waxaa lagu liis gareeyay Heshiiska Guri dejinta waxaana si faah-faahsan loogu sharxi doonaa Hirgelinta Qorshaha. Eedaysanayaasha waxay balan kuqaadeen in ay la kulmaan balan qaadyadaan inta lagu guda jiro wakhtiga dacwadu ay ahaanayso maxkamada horteeda.

(3) Aasaaska Kabixida

Aasaaska Kabixida waa waxyaabaha ama natiijooyinka ay isticmaali doonto Maxkamadu si ay u go'aansato haddii ay Eedaysanayaashu sameeyeen wax kufilan si ay ugu ogolaadaan joojinta dacwada.  Eedaysanayaasha uma baahna in ay waxkasta u sameeyaan si fiican.Waxaa ku khasab ah in ay tusiyaan maxkamada in ay haystaan  “si buuxda loogu hoggaansamay” ay lajirto aasaaska kabixida loo baahanyahay. Haddii ay midaani tusiyaan, dacwadu way dhammaanaysaa.

## I. Ujeeddooyinka

Ujeeddada ugu muhiimsan ee Heshiiska Guri dejintu waa in uu aqoonsado, baaritaan iyo qiimayn macquul u ah xubnaha dabakhyada, kadibna bixiyaan adeegaha Isku duubka ay lajirto Adeegaha Xoog saarida ee lasiiyo xubnaha dabakhyada u qalma una baahan adeegahaas. Heshiiska Guri dejintu waxay kaloo leedahay ujeeddooyin kale oo muhiim ah.

- Isku duubka ay lajirto Adeegaha Xoog saarida waxaa laga bixin doonaa gobolka oo dhan. Adeegaha waxay ahaan doonaan kuwo wakhti kuxiran. Waxaana jiri doona adeego kufilan si loo buuxiyo dalabku.Adeeguhu waxaa loo keeni doonaa qaab waxtar leh, wax qabadkana waxaa lagu qiyaasi doonaa daliil. Adeeguhu waxaa laga dhigi doonaa mid keli keli ku ah baahida xubin kasta oo  dabakhyada dadka katirsan. Adeeguhu waxay ku habboonaan doonaan qaabka barnaamijka Isku duubkaay lajirto Adeegaha Xoog saarida. Keenida adeeguhu waxay raaci doonaan qaanuunka daryeelka Caafimaadka gobolka iyo dowlada dhexe iyo xeerarka.
- Xubnaha dabakhyada kuwaas oo diiday adeegaha waxaa loo sheegi doonaa in ay xaq u leeyihiin in ay codsi soo qortaan, waxayna yeelan doonaan dhegaysi maxkamadeed kahor xukunka cadaalada ah.
- Wakaaladaha u adeega-caruurta iyo deeq bixiyaasha ayaa isku duwi doona taageerida ay siinayaan xubnaha dabakhyada. Middaana waxay horumarin doontaa wax qabadka adeegaha sidoo kale waxay hormarin doontaa natiijooyinka qoysaska iyo dhallinyarada. Isku duwidu waxay yarayn doontaa kala go'a adeegaha loogu talo galay xubnaha dabakhyada, fogayn doontaa kala qaybinta iyo wakhti luminta, iyo qiimo jabka;
- Waxaa jiri doona waxbarasho, tababar, carbis iyo ilaalin adeegyo bixiyaasha la ilaaliyo, dhalinyarada iyo qoysaskoodaba.

- Wakaaladaha u adeega-caruurta, dhallinyarada iyo qoysaska, iyo kuwo kaleba waxay isula shaqayn doonaan wada jir si ay u qaataan go'aano kusaabsan sida isbedelada kudhaca Heshiiska Guri dejinta loo fulin lahaa. Middaana waxaa lagu magacaabaa “qaab dhismeedka xukunka” ay u dhisantahay Heshiiska Guri dejinta.
- Heshiiska Guri dejintu wuxuu keeni doonaa isbedelo taas oo yaraynaysa isbitaal dhigida iyo howlaha guriga-dibadiisa-ah.
- Gelida Adeegaha Isku duubka Xoog saarida hoos timaada Heshiiska Guri dejinta waxay kucaawinaysaa caruurtu in ay ammaan ku ahaadaan, guriga, iyo horumarka dugsiga; kafogaanta gelida denbiga fudud ee kadhaca dhallinyarada; kor u qaadaan horumarka dhallinyarada; kadibna gaarsiiyaan heerka ugu sareeya xubnaha dabakhyada’ kobcid suurto gal ah oo caafimaad iyo isku filnaan dadka waawayn ah.

## II. Balanqaadyada

Heshiiska Guri dejintu wuxuu u baahanyahay in Eedaysanayaashu si buuxda ugu hoggaansamaan ay lajirto diyaarin balanqaadyo faah-faahsan. Balanqaadyada iyo khadadka wakhtigu waa kuwo laga fulin karo xaga Qaaliga illaa ay dacwadu kadhammaato kadibna laga joojiyo. Khadadka wakhtigu waa kuwo la bedeli karo haddii Eedaysanayaasha, Dadka dacwoonaya, iyo Qaaliga ay ogolaadaan.

**Balanqaadyada aasaasiga ah  waxaa kujira:**

### A. Gelida Adeegaha Isku duubka Xoog saarida iyo Keenida Adeega

Eedaysanayaashu waxay ogolaadeen in ay bixiyaan daboolida dayeelka Caafimaadka soo socda ee adeegaha caafimaadka maskaxda lasiiyo xubnaha dabakhyada:  (1) Isku duwis Daryeel Khaas ah, (2) Xoog saarida Adeegaha Kusalaysan Guriga iyo Jaaliyada, iyo (3) Adeegaha Xasiloonida iyo Dhexgalka Dhibaatada Lawareejin karo. Sedexdaan nooc ee adeegaha waxaa lagu magacaabaa  Adeegaha Isku duubka Xoog saarida.WISe waxaa laga soo gaabiyay “Isku duubka ay lajirto Xoog saarida Adeegaha.”  Sharaxaad faah-faahsan oo adeegahaan kusaabsan ayaa laga heli karaa Lifaaqa A oo ah Heshiiska Guri dejinta oo buuxa .

### B. Adeegaha Sanad Maaliyeedka Gobolka 2014 iyo Adeegaha lasiiyo Dadka dacwoonaya ee Lamagacaabay

Bisha Janaayo ee sannadka 2014, Eedeysanayaashu waxay bilaabi doonaan helitaanka guuritaanka adeegaha caafimaadka maskaxda xoog saarida jirta ee loogu talo galay Xoog saarida Adeegaha Isku duubka. Midaana waxaa lagu samayn doonaa meelaha halka ay jiraan adeego kufilan iyo maal gelinta si loo buuxiyo baahooyinka.

### C. Horumarinta Shaqaalaha iyo Tababarkooda

Eedaysanayaashu waxay samayn doonaan kooxo si ay u helaan una tababaraan bixiyaasha adeega Isku duubka ay lajirto Xoog saarida Adeegaha. Kooxdaan waxay si madax banaan uga shaqayn doontaa gobolka. Waxaana hoggaamin doona dhallinyarada iyo qoysaska, wakaaladaha gobolka, iyo jaamacadaha midoobay. Kooxuhu waxay horumarin doonaan barnaamijyo tababar sii soconaya. Tababarada waxaa kujiri doona waxbarasho, tababar, lataliye iyo taageero teknooliji ah oo loogu talo galay wakaaladaha bixinaya Isku duubka ay lajirto Xoog saarida Adeegaha. Tababarada waxaa laga bixin doonaa gudaha iyo guud ahaan gobolka.Tababaradu waxay kucaawin doonaan bixiyaasha adeegaha Isku duubka ay lajirto Xoog saarida in ay buuxiyaan heerarka tayada.

### D. Hawsha ay Xaqa u leeyihiin Xubnaha Dabakhyada

Xubnaha dabakhyadu waxay xaq u leeyihiin in ay diidaan qaraarada kusaabsan adeegahooda. Haddii aay diidaan, waxay helayaan dhagaysi maxkamadeed. Meesha dhagaysigu qof cadaalad ah ayaa go'aanka qaadan doona. Middaan waxaa lagu magacaabaa hawsha xaqa ah. Eedaysanayaashu waxay u baahnaan doonaan Qorshooyinka Caafimaadka Bukaan socodka Hore loo bixiyay (PIHPs) (sidoo kale loo yaqaano sida Caawimaada Gobolka Isku xiran) u sheegaya xubnaha dabakhyada waxyaabaha kusaabsan xuquuqdooda ay xaqa u leeyihiin hawsha. Qorshooyinka Caafimaadka Bukaan socodka Hore loo bixiyay wuxuu samayn doonaa midaan asaga oo bixinaya Ogaysiis Ficil. Ogaysiiskaan wuxuu tallo siin doonaa xubnaha dabakhyada

xaqooda  ay u leeyihiin hawsha wakhti kasta oo ay Qorshooyinka Caafimaadka Bukaan socodka Hore loo bixiyay diido, dhamaynaya ama yaraynaya adeegaha, ama xubinka dabakhyada uusan ogolaanin ay lajirto tallooyin daawayn xadidan. Eedaysanayaasha ayaa sharxi doona ogaysiiskaan iyo xaqa hawsha ilaalinta xeerarka gobolka.

**E. Xukumida iyo Wadashaqaynta**

Heshiiska Guri dejinta waxay sii kordhin doontaa doorka qoyska iyo dhalinyarada ee samaynta qaraarada kusaabsan sida adeegaha Isku duubka ay lajirto Xoog saarida Adeegaha loo keeno. Eedaysanayaashu waxay marti qaadi doonaan qoyska, dhallinyarada iyo dadka matala jaaliyada gudaha si ay ugu biiraan kooxaha xukumida. Kooxahaan waxaa lagu magacaabaa Qoyska Dhalinyarada iyo Nidaamka Waddaaga Miisaska-Wareegsan (FYSPRT).  Waxay bixin doonaan macluumaad kusaabsan qaabka adeegaha loo maamuli doono loona keeni doono.

Eedaysanayaashu sidoo kale waxay heshiisyo la lahaan doonaan wakaaladaha u adeega guud ahaan dhallinyarada gobolka. Middaana waxaa kujiri doona Qaybta Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka iyo wakaaladaha HCA. Heshiisyadu waxay u baahanyihiin wada shaqayn iyo isku duwis daryeel oo loogu talo galay xubnaha dabakhyada. Marka dhallinyaradu helaan Isku duubka ay lajirto Xoog saarida Adeegaha, waxay haysan doonaan Koox Cunug iyo Qoys kuwaas oo kahadlaya baahooyinka daawaynta. Haddii dhalinyaradu loogu adeego wakaalado qaybo baddan leh, dadka matala gudaha iyo gobolada ee kasocda wakaaladahaan waxaa lagu marti qaadi doonaa in ay kasoo qayb galaan Kooxaha Cunuga iyo Qoyska. Ilaha maal gelintu ayaguna sidoo kale waxaa la isugu duwi doonaa si wanaagsan.

Eedaysanayaashu waxay aruurin doonaan macluumaad kusaabsan adeegaha labixiyay. Eedaysanayaasha iyo Qoyska Dhalinyarada iyo Nidaamka Waddaaga Miisaska-Wareegsan ayaa isticmaali doona macluumadaan si ay ugu caawiso samaynta qaraarada kusaabsan sida lagu hormarinayo adeegaha.

**F. Maamulida Tayada leh**

Eedaysanayaashu waxay horumarin doonaan Qorshe Ceymis oo Tayo leh (QAP). Waxay heli doonaan gelid katimid qareenada Dadka dacwoonaya iyo hanti hayaasha. Qorshaha Ceymiska Tayada lehi wuxuu sharxi doonaa sida qalabka ceymiska tayada lehi iyo hawlaha loogu hormarin lahaa Heshiiskaan. Qorshaha Ceymiska Tayada lehi  wuxuu dabooli doonaa ayada oo ay lajirto nidaamyo kale oo ceymis tayo leh oo jira, barnaamijyo, iyo hawlo. Qorshaha Ceymiska Tayada lehi wuxuu qiyaasi doonaa fulinta iyo horumarka ku aadan kulamada balanqaadyada kujira Heshiiska Guri dejinta.

Eedaysanayaashu waxay qiyaasi doonaan lambarka caruurta la aqoonsaday, la baaray, la qiimeeyay loona wareejiyay xaga Isku duubka ay lajirto Xoog saarida Adeegaha. Eedaysanayaashu waxay siin doonaan macluumadaan dad weynaha waxayna kusiin doonaan koorso fulinta Heshiiska Guri dejinta. Qorshaha Ceymiska Tayada lehi waxaa labuuxin doonaa laguna qabatami doonaa hal sanno gudaheeda oo laga bilaabo taariikhda Heshiiskaan Guri dejinta la aqbalay.

**G. Qorshaha Fulinta iyo Hawsha**

Eedaysanayaashu waxay kubuuxin doonaan Fulinta Qorshaha lix bilood gudahooda ee ogolaanshaha ugu danbeeya maxkamada ee Heshiiska Guri dejinta. Eedaysanayaashu waxay isticmaali doonaan Qaab dhismeedka Xukumida lagu sharxay kor si loo hormariyo Qorshaha Fulinta. Middaana waxaa kujira isticmaalka macluumaada Qoyska Dhalinyarada iyo Nidaamka Waddaaga Miisaska-Wareegsan FYSPRTs.  Qareenada Dadka dacwoonaya sidoo kale waxay bixin doonaan macluumaad. Eedaysanayaashu waxay keeni doonaan Qorshaha Fulinta oo buuxa Maxkamada si loo ogolaado. Qaaliga keliya wuxuu ogolaan doonaa qorshaha haddii qareenku u maleeyo in qorshuhu uu yahay mid macquul ah.

Biloowga Nofembar 15, 2014, Eedaysanayaashu waxay bixin doonaan warbixin sannadle ah, Dadka dacwoonaya, iyo dadweynaha. Warbixintaan waxay sharxi doontaa horumarka' Eedaysanayaasha la kulmaya waajibaadkooda hoos imaada Heshiiska Guri dejinta. Warbixinta

waxaa kujiri doona guulaha lagaaray iyo hawlaha harey. Waxay aqoonsan doontaa mushkiladaha suurto galka ah ama kuwa dhabta ah. Sidoo kale waxaa kujiri doona sharaxaad kusaabsan waxyaabaha lasameeyay si loo xaliyo mushkiladaha la aqoonsaday.

## III. Aasaaska Kabixida iyo Hawlaha

Qaybaha filanaya Dadka dacwoonaya waxay buuxin doonaan fulinta Heshiiska Guri dejinta marka ay tahay ama kudhowaadkii bisha Juun 30, 2018.  Dhammaan xeerarka hoos imaada heshiiska way dhammaan doonaan haddii Eedaysanayaashu tusiyaan in ay si buuxda ugu hoggaansanyihiin aasaaska kabixida. Aasaaska kabixidu waa keliya qiyaasaha tusin kara gobolka Washington in labuuxiyay xeerarkeeda, sidaas daraadeedna, u ogolaata Qaaliga in uu joojiyo dacwada. Haddii gobolka Washington uu yahay mid si buuxda loogu hoggaansamay, dacwadu waa mid lajoojin doono. Waxaa jira aasaas kabixid faah-faahsan oo loogu talo galay mawduuca soo socda:

- Gelida Isku duubka ay lajirto Xoog saarida Adeegaha iyo Keenida Adeega;
- Ilaalada Howsha Xaqa ah;
- Nidaamka Wadashaqaynta iyo Xukumida;
- Qorshaha Fulinta; iyo
- Maamulida Tayada leh.

## IV. Gelitaanka Macluumaada Qareenka Dadka dacwoonaya

Qareenada Dadka dacwoonaya ayaa ilaalin doona fulinta Heshiiskaan. Waxay xaq u lahaan doonaan gelida macluumaada kusaabsan horumarka Eedaysanayaasha. Dadka dacwoonaya waxaa laga yaabaa in ay u baahdaan macluumaad dheeri ah taas oo aan ayagu heli karin ee hoos timaada heshiiska. Haddii ay midaasi dhacdo, waxay codsan karaan macluumadaas; laakiin waxaa khasab ku ah in ay bixiyaan sababta ay ugu baahanyihiin macluumaada. Haddii qareenada Dadka dacwoonaya ay raadinayaan macluumaad qarsoodi ah taas oo kujirta diiwaanka dadka xubnaha ka ah dabakhyada, waxaa khasab ku ah in ay helaan sii deyn katimid xubinkaas dabakhyada katirsan ama qof matala oo ogolaansho u haysta. Haddii aynaan helin siideyn, Qareenada Dadka dacwoonaya waxay raadin karaa amar kayimid Qaaliga oo cadeynaya in macluumaada lasiidaayo.

## V. Lacagaha qareenka' iyo qiimooyinka.

Ayada oo u hoggaansan Maxkamada, Eedaysanayaashu waxay ogolaadeen in ay u bixiyaan qareenada Dadka dacwoonaya Seddex Milyan Boqol kun oo Doolar ($3,100,000.00) oo ah lacagta uu qaato qareenka iyo qiimooyinka. Macluumaad faah-faahsan oo kusaabsan hawsha uu qareenka Dadka dacwoonaya qabto iyo qiimooyinka labixiyo waxaa laga heli karaa Qoraalka rasmiga ah ee lagu Taageero Lacagaha iyo Qiimooyinka laga helo boggaan intarnatka:

http://www.disabilityrightswa.org/kids-community-based-mental-health

Si aad u hesho nuqulka Qoraalka rasmiga ah ee lagu Taageero Lacagaha iyo Qiimooyinka iyo waxyaabaha taageerada ah, ama in aad weydiiso su'aal kusaabsan lacagaha iyo qiimooyinka, wac teleefoonka-lacag la'aanta ah ama u qor warqad Xuquuqaha Curyaanimada Washington:

1-800-562-2702

Disability Rights Washington
315 5th Ave S. Suite 850
Seattle, WA 98104

TRLawsuit@dr-wa.org

SM

## VI. Macluumaad Dheeri ah iyo Dhegaysi Cadaalad ah

Kani waa khulaasada Heshiiska Guri dejinta. Haddii aad doonaysid in aad ogaatid wax baddan oo kusaabsan Heshiiska Guri dejinta ama in aad lawadaagto ra'iyigaada Qaaliga, waxaad haysataa doorashooyin baddan.

**Akhri guud ahaan Heshiiska Guri dejinta.** Haddii adiga ama qofkale oo aad garanayso uu yahay mid katirsan xubnaha dabakhyada, kabaro halkaan wax baddan oo xuquuqdaaada kamid ah:

http://www.disabilityrightswa.org/kids-community-based-mental-health

Halkaas, waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeri ah. Bogga intarnatka waxaa kujira nuqulo kamid ah Heshiiska Guri dejinta lasoo jeediyay. Sidoo kale waxaa kujira waraaqo sharxaya adeegaha Isku duubka ay lajirto Xoog saarida Adeegaha iyo sida loo galo adeegahaan.

**Kaqayb gal fadhiyada shirarka muuqaalka ah iyo macluumaada.** Waxaad daawan kartaa shirarka duuban ee muuqaalka ah ee kusaabsan Heshiiskaan Guri dejinta kuwaas oo kadhaca meelooyin baddan oo gebi ahaanba gobolka kamid ah bilooyinka yar ee soo socda. Sidoo kale waxaa jiri doona bandhigyo labbo hal-qof kujira ah waad kasoo qayb gali kartaa. Haddii aad u baahantahay macluumaad dheeri ah oo kusaabsan taariikhaha ay shirarkaasi dhacayaan iyo meelaha ay kadhacayaan, booqo boggaan intarnatka:

http://www.disabilityrightswa.org/kids-community-based-mental-health

**Weydii su'aalo.** Heshiiska Guri dejintu waa mid dheer kana buuxaan macluumaad faah-faahsan. Xuquuqaha Curyaanimada Washington (DRW) waa mid diyaar u ah in ay kaaga jawaabto su'aalahaaga. Xuquuqaha Curyaanimada Washington waa mid kamid ah ururada ugu adeega sida qareen oo kale xubnaha dabakhyada. Lahadlida aad lahadasho Xuquuqaha Curyaanimada Washington ma ahan mid wax lacag ah kugu kalifaysa. Waxaad kawici kartaa teleefoonka-lacag la'aanta ah waana lambarkaan 1-800-562-2702.

**U gee ra'iyigaada iyo fikradaada qaybta Xuquuqaha Curyaanimada Washington ama Maxkamada.** Qof kasta oo rabba in uu faalo kabixiyo Heshiiska Guri dejinta, ha noqdo qofkaasi mid taageersan ama mid kasoo horjeeda, wuxuu samayn karaa in uu fariin qoran oo faalo kabixin ah si toos ah ugu soo diro iimayl ahaan, ama qaabab kale oo uu ku keeni karo aragtidiisa.

Ku keen faalooyinka qaybta Xuquuqaha Curyaanimada ee Washington halkaan adiga oo kusoo aadinaya:
Disability Rights Washington
315 5th Ave. S., Suite 850
Seattle, WA 98104
TRLawsuit@dr-wa.org

Wax kasta oo faalo kabixin ah oo ay hesho qaybta Xuquuqaha Curyaanimada Washington, ama dabakhad kasta qareenkeeda kuliis gareysan dacwadaan gudaheeda, waxaa lasiin doonaa Maxkamada.

Hadalada qoraalka ah sidoo kale ayaguna waxaa lasiin doonaa Maxkamada. Faalooyin qoran oo ka ahaatay Maxkamada waa in lahelaa oo aan kadib dhicin Disembar 5, 2013. Faaladaas oo kale waa in ay kujirto ( khasab ay tahay in ay kujirto) Lambarka Dacwada loogu talo galay dacwadaan, kaas oo ah: Lambarka. C09-1677-TSZ. Ku gee faalooyinka maxkamada cinwaankaan soo socda:

Office of the Clerk of the Court
United States District Court for the Western District of Washington, Seattle
700 Stewart Street

Seattle, WA 98101

Kaqayb gal dhegaysiga cadaalada ah.  Faalooyin bixin oo hadal ah ayaa lagu samayn karaa goobta dhegaysiga cadaalada ah ee kadhici doona Seattle maalinta Khamiista, Bisha Disembar 19, 2013  saacadu marka ay tahay 10:00 SUBAXNIMO.

Cinwaanka soo muuqanaya ee loogu talo galay dhegaysiga waa:
Courtroom of the Honorable Thomas S. Zilly
United States District Court for the Western District of Washington, Seattle
700 Stewart Street, Floor 15
Seattle, WA 98101